

Qirashada Masuuliyadahayga Ah Sida Loo shaqeyaha Daryeel Bixiyayaashayda Shakhsiyeed Ahaan – Nuqulka cudurka faafa ee COVID ee ku-meelgaarka ah

Acknowledgement of My Responsibilities As The Employer of My Individual Providers
Temporary COVID pandemic version

Waxaan doortay in aan adeegaha ka qaato Daryeel bixiyaha Qofka (IP) midaas oo laga bixiyo dhinaca Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS). Anigu waan fahansanahay in masuuliyadahayga ah sida loo shaqeyaha Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed ay kamid yihiin:

Baaritaanada Asalka Lagu sameeyo Daryeel bixiyayaashayda:

- Anigu waan fahansanahay in Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed ay tahay in uu ku baaso dhammaan baaritaanka asalka ee gudaha-gobolka ah, balse shuruudaha baaritaanka fara qaadista gobolka dibadiisa ah hadda waa laga tanaasulay iyada oo sabab u ah cudurka faafa ee COVID-19. Waxaan shaqaalayn karaa Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed si uu dhakhso ugu bilaabo ama in aan sugo natiijada baaritaanka fara qaadista. Haddii aan shaqaaleeyo Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed ka hor inta aan lasoo celinin natiijada fara qaadista oona la oggaado in daryeel bixiyahayga uusan u qalmin, Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ma ahaanayso mid lacag siinaysa Daryeel bixiyahaasi Qofka. Waxaan haysan doonaa doorashada aan ku xulanayo Daryeel bixiye Qofeed kale midkaas oo u qalma in uu shaqeyo:

- Waxaan doonayaa in aan shaqaaleeyo Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed (IP) aniga oo og in shuruudaha fara qaadista gobolka dibadiisa ah in hadda laga tanaasulay iyadoo sabab u ah cudurka faafa ee COVID-19. Anigu waan fahansanahay in Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed ay khasab tahay in uu ku baaso baaritaanka asalka gobolka-gudihisa ah.** Muraajacooyinka baaritaanka asalka gobolka-gudihisa ah; (1) diiwaanada xukun dembi ee ka ahaada tooska Ilaalada Gobolka Washington, (2) diiwaanada ku jira xogta macluumaadka Maxkamada Gobolka Washington, iyo (3) natiijoyinka ka ahaada wakaaladaha gobolka Washington.

AMA

- Waxaan rajaynaa in aan sugo illaa laga dhammeeyo baaritaanka fara qaadista gobolka dibadiisa ah kahor inta aan shaqaalaynin Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed.** Baaritaanka gobolka dibadiisa ah waxaa kamid ah diiwaanada baaritaanka dembiga gobolo kale ah.

Magaca Daryeel bixiyaha Shakhsiyeed: _____

In La ahaado Loo shaqeyo:

- Waa in aan baaritaan ku sameeyo oona shaqaaleeyo Daryeel bixiye Shakhsiyeed u qalma;
- Waa in aan la xiriiro maamulhayga kiiska si aan u habsado in Daryeel bixiyaha Shakhsiyeed uu haysto qandaraas sax ah.
- Anigu waan fahansanahay in Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed aan loo oggolayn in uu shaqeyo haddii ay helaan oggaysiis ka ahaada dhinaca Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada midkaas oo sheegaya in ay joojiyaan shaqada;
- Anigu waan fahansanahay in Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed aanan loo oggolayn in uu shaqeyo haddii aanan u qalmin in ay ahaadaan Daryeel bixiye Shakhsiyeed;
- Anigu waan fahansanahay in aan heli doono oggaysiis haddii Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed aanan loo oggolayn in uu shaqeyo. Haddii aan u oggolaado in uu shaqeyo kadib taariikhda aan helay oggaysiiskaas, Anigu ayaa si gaar ah masuul uga noqon doona lacag bixinta la siinayo Daryeel bixiyaha Shakhsiyeed;
- Waxaa khasab igu ah in aan habsado in Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed uu ka shaqayn karo gudaha Waddanka Maraykanka. Waxaa khasab igu ah in aan buuxiyo oona haysto foomka I-9. Waxaa dhici karta in aan la xiriiro [Bogga Internetka USCIS I-9 Ammaanka Waddanka](#) ama aniga oo soo waca 1-888-464-4218 haddii aan u baahdo macluumaad dheeraad ah;
- Anigu waan fahansanahay in aan la xiriiro karo Diwaan gelinta Wareejinta Daryeelka Guriga (HCRR) haddii aan u baahdo in la igu caawiyo helida Daryeel bixiye Shakhsiyeed. Adeegaan waxaa laga helayaa meelo baddan oo gobolka ama waddanka ah. Waxaan kala xiriiro karaa Diwaan gelinta Wareejinta Daryeelka Guriga lambarka teleefoonkan 1-800-970-5456. Waxaan ka geli karaa Diwaan gelinta Wareejinta Daryeelka Guriga boggaan internetka ah: <http://www.hcrr.wa.gov/>

Jadwal u samaynta Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed Si uu u Shaqeyo:

- Anigu waan fahansanahay in Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed **uusan** shaqayn karin wax ka baddan xadkooda shaqada todobaadka asaga oo aan oggolaansho ka haysanin dhinaca Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada;
- Anigu waan fahansanahay in Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed uu haysto kaliya hal xad shaqo todobaad. Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed ma dhaafi karo xadkaan haddii uu u shaqeyo dad baddan oo aan aniga ahayn;
- Waa in aan iska habsadaa in Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed uusan shaqaynin wax ka baddan xadkooda shaqada todobaadka iyo wax ka baddan saacadahayga adeega bileed;
- Waa in aan helo daryeel bixiye ku meel-gaar ah midkaas oo ii qabta baahooyinkayga, marka aan mid u baahanahay;
- Waxaa dhici karta in aan shaqaaleeyo daryeel bixiyayaal dheeraad ah si ay u qabtaan baahooyinkayga una raacaan

xeerarka wakhtiga dheeriga ah;

- Waa in aan iska habsadaa in Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed uu fahmayo qorshahayga daryeelka, raacayo qorshahayga daryeelka, oona ku shaqayn karo jadwalka aan doonayo;
- Waxaan kor kala soconayaa shaqada uu qabto Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed. Xitaa haddii Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed uu qandaraas kula jiro Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada, Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ma ahan mid la soconaysa oo kor ka ilaalinaysa Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed.

Bixinta Gacan-gashi:

- Waa in aan siiyo gacan-gashi Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed midkaas oo loogu talagalay hawlaha daryeelka shakhsiyeed ee gacmaha-lagu qabto marka loo baahdo:
- Waxaan ku heli karaa illaa 200 oo gacmo-gashi ah dheeftayda (Gargaarka caafimaadka) Apple Health. Waxaan awoodi karaa in aan helo wax baddan haddii caafimaad ahaan ay daruuri u tahay.
- Haddii aan haysto daryeelka maamulan ee (Gargaarka caafimaadka) Apple Health, Waxaan la xiriiri karaa qorshahayga caafimaadka ama dhakhtarkayga si aan u dalbado gacmo-gashi, ama waxaan galayaa boggaan internetka ah <https://www.hca.wa.gov/assets/billers-and-providers/13-010.pdf>
- Haddii aan haysto ceymis ku jirid Apple Health ah midkaas oo aan ahayn tooska daryeelka maamulan waxaa dhici karta:
 - In aan ka waco bixiyaha qalabka caafimaadka liiska ku jira bogga internetka Maamulka Daryeelka Caafimaadka halkan: https://www.hca.wa.gov/assets/billers-and-providers/ffs_providers_non_sterile_gloves.pdf ama
 - In aan waco dhakhtarkayga; ama
 - In aan ka waco Xarunta Adeega Caafimaadka lambarkan 1-800-562-3022. Lambarkan wuxuu ku qoranyahay dhabarka Kaarkayga Adeega Caafimaad ee buluuga ah. Wixii ku saabsan macluumaad dheeraad ah ee khuseeya helida gacmo-gashiga ka booqo halkan bogga internetka Maamulka Daryeelka Caafimaadka <http://www.hca.wa.gov/medicaid/dme/Pages/default.aspx>.

Wajibaadka Dhagaale:

- Anigu waan fahansanahay in Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada aanan masuul ka hayn xajinta ama bixinta canshuurta dakhliga loogu talagalay Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed aan ka ahayn haddii Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed uu sidaas ka codsado ayaga;
- Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada waxay masuul ka tahay xajinta iyo bixinta Dammaanada Bulshada iyo canshuuraha Daryeelka caafimaadka (FICA);
- Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada waxay masuul ka tahay xajinta iyo bixinta canshuuraha shaqo la'aanta gobolka iyo federaalka (FUTA/SUTA) aan ka ahayn haddii Daryeel bixiyaha Shakhsiyeed uu yahay waalidkayga ama ilmahayga midkaas oo u dhaxeeya da'ooyinka 18 iyo 21 sanno;
- Waa in aan u soo sheego lacag bixinada ka qayb qaadashada Daryeelkayga Shakhsiyeed gobolka iyo wakaaladaha canshuurta federaalka haddii Aniga:
 - Ka qaato adeegahayga tooska Adeegaha Bulshada iyo Guriga ama Wakaaladayda Deegaanka gudaha ee ku saabsan Da'weynaanta (AAA), oona
 - Shaqaaleysiiyo Daryeel bixiye Shakhsiyeed, oona
 - Bixiyo ka qayb qaadashada loogu talagalay adeegaha Daryeelkayga Shakhsiyeed.
 - Wixii ku saabsan macluumaadka canshuurta, kala xiriir Adeega Dakhliga Gudaha lambarkan 1-800-829-1040 ama Waaxda Gobolka Washington ee Dammaanada Shaqada lambarkan 1-888-836-1900.

La xiriirida Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada:

- Waxaan la xiriiri doonaa Maamulaha Kiiska haddii Aniga:
 - Qabbo wax wel-welo ah oo ku saabsan qorshahayga daryeelka ama ku saabsan tayada daryeelka aan ka helayo dhinaca Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed;
 - Aanan qaadanin adeegaha uu Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed dalbanayo lacagtooda;
 - Aanan qaadanin adeegaha lagu oggolaaday gudaha qorshahayga daryeelka;
 - Doonayo in aan bedelo ama ku daro daryeel bixiye;
 - U baahanahay caawimaad la igu caawiyo shaqaalaynta/maamulida Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed; ama
 - Doonayo in aan u qoondeeyo saacado baddan Daryeel bixiyahayga Shakhsiyeed kuwaas oo ka baxsan xadkiisa/xadkeeda shaqada todobaadka.

Anigu sidoo kale waan fahansanahay in aan xaq u leeyahay in aan rafcaan ku sameeyo haddii Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ay ii diido doorashada aan doorto daryeel bixiye.

SIXIIXA WAKIILKA SHARCIYEED / MACAMIILKA

TAARIKHDA

LAMBARKA AQOONSIGA SHAKHSIGA MACAMIILKA

MAGACA QORAN EE WAKIILKA SHARCIYEED / MACAMIILKA